## MADADAALADA

*Howlaha duulimaadka madadaalada leh waxaa maamula 49 USC 44809, oo ah Ka Dhaafitaanka Hawlgallada Madadaalada ee Xaddidan. Xeerarkaan waxay khuseeyaan marka aad diyaaradda aan duuliyaha lahayn u duulinayso oo keliya madadaalo ahaan ama sababo shakhsiyeed, ee aan loogu talagelin howlo ganacsi, in lacag lagu helo, ama ujeeddooyin shaqo.*

### KA HOR INTA AADAN DUULIN

- Diiwaangeli diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee ka culus 0.55 rodol ama 250 garaam
- Ku calaamadee diyaaradda lambarka diiwaangelinta Federal Aviation Administration (FAA, Maamulka Duulista Hawada Federaalka ee Maraykanka)
- Dhammee The Recreational UAS Safety Test ((Imtixaanka Badqabka (Nidaamka Diyaaradaha Aan Duuliyaha Lahayn) ee Madadaalada)), oo sidoo kale loo yaqaan TRUST
- Markaad duulinayso horay u qaado caddeynta dhammeystirka TRUST iyo diiwaangelinta
- Hubi hawada la isticmaalayo, TFRs, xeerarka deegaanka, iyo shuruudaha Remote ID.

### MARKA AAD DUULINAYSO

- Raac tilmaamaha ururrada bulshada
- Ka fogoow diyaaradaha ay dad saaran yihiin
- U hoggaansanoow xeerarka Remote ID
- Ku hay diyaaradda aan duuliyaha lahayn meel aad si toos ah indhahaaga ugu arki karto
- Hel oggolaanshaha FAA ka hor inta aadan ku duulin hawo kasta oo laga maamulo hagidda duulimaadyada
- Ku duul joog dhan 400 fiit ama ka hooseeya hawada aan lagu maamulin hagidda duulimaadyada
- Ha ku dul duulin hana carqaladayn goobaha hawlgallada gurmadka degdegga ah.
- Ha ku dul duulin dadka dushooda ama gaadiidka socda.
- Waligaa ha duulin adoo isticmaalay waxyaabo maandooriyaha ah
- Marna ha u duulin qaab aan ammaan ahayn

## HAWLAHA BEERFALASHADA

*14 CFR Qaybta 137 waxay khusaysaa marka diyaarad aan duuliye lahayn loo isticmaalo buufinta ama faafinta walxo ay ka mid yihiin bacrimiyeyaasha, sunta cayayaanka, jeermis dileyaasha, walxaha lagu daweeyo ciidda, ama walxo kale oo la mid ah. Hawlgalladaan waxay u baahan yihiin oggolaansho dheeraad ah oo ka yimaadda FAA, marka laga reebo shuruudaha aasaasiga ah ee Qaybta 107 ee khuseeya diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee loo isticmaalo howlaha ganacsiga iyadoo isticmaalka sunta cayayaanka ama kiimikooyinka ay sidoo kale ku xiran tahay shuruudaha EPA, tilmaamaha ku qoran summadda badeecadda, iyo shuruudaha gobolka ee khuseeya dadka loo oggolaaday inay isticmaalaan sunta cayayaanka.*

## HOWLAHA GANACSIGA

*Inta badan hawlgallada diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee aan ahayn kuwa madadaalada oo kuna shaqeeya diyaarado ka yar 55 rodol, waxay hoos yimaadaan 14 CFR Qaybta 107.*
*Hawlgallada lagu isticmaalo diyaaradaha ka culus 55 rodol, Beyond Visual Line of Sight (BVLOS, Duulimaadka Ka Baxsan Aragga Tooska ah), gaarsiinta alaabaha, iyo hawlgallada kale ee horumarsan waxay u baahan yihiin oggolaansho dheeraad ah, ka dhaafitaan, ka reebitaan, shahaado, ama fasax.*

### KA HOR INTA AADAN DUULIN

- Diiwaangeli diyaaraddaada aan duuliyaha lahayn, iyadoon loo eegayn culeyskeeda
- Noqo Duuliye Fog oo Shahaado ka Haysta FAA
- Hubi hawada aad ku duulayso, TFRs, iyo xayiraadaha deegaanka

### MARKA AAD DUULINAYSO

- Hel oggolaanshaha FAA kahor inta aadan ku duulin hawada laga maamulo hagidda duulimaadyada
- Ku hay diyaaradda aan duuliyaha lahayn meel aad si toos ah indhahaaga ugu arki karto, haddii aan lagaa dhaafin shuruuddaas
- Ku duul joog dhan 400 fiit ama ka hooseeya haddii uusan xeer ama oggolaansho kuu oggolaanayn si kale
- Isticmaal nalalka ka hortagga isku dhaca habbeenkii.
- Ka fogoow inaad ku dul duusho dadka dushooda ama gaadiidka socda, haddii aan laguu oggolaan
- U hoggaansanoow xeerarka Remote ID

## XAALADO GAAR AH

*Ka hor inta aadan duulin, mar walba hubi xayiraadaha diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee ay dejisay dowladda federaalka, gobolka, maamulka deegaanka, iyo goobta gaarka ah ee aad ku duulayso, oo ay ku jiraan TFRs, xayiraadaha garoomada ciyaaraha, hawada laga maamulo hagidda duulimaadyada ee garoomada diyaaradaha, goobaha hawlgallada gurmadka degdegga ah, iyo xeerarka milkiilayaasha hantida.*




## SI BADQABAH U DUUL

Badqabka duulimaadku waa inuu noqdaa mudnaanta koowaad ee duuliye kasta oo diyaarad aan duuliye lahayn. Kahor iyo inta aad duulimaadka ku jirto, qaado waqti aad ku eegto agagaarkaaga, ku aqoonsato khataraha iman kara, kana fogaato khataraha ama isku dhacyada suurtagalka ah ee hawada ka dhici kara. Raacista habraacyada ugu wanaagsan ee fudud iyo tilmaamaha ay dejisay Federal Aviation Administration waxay gacan ka geysataa ilaalinta badqabka qof kasta.

## SI MAS'UULIYADLEH U DUULI

Hubin degdeg ah oo aad ku samayso diyaaraddaada aan duuliyaha lahayn waxay wax weyn ka tari kartaa badqabka. Hubi inay ku jirto xaalad wanaagsan ka hor inta aadan duulin, isla markaana la soco agagaarkaaga inta aad duulimaadka ku jirto. U fiirsashada dadka, hantida, iyo deegaanka kugu xeeran waxay kaa caawinaysaa inaad si mas'uuliyad leh u duusho, isla markaana waxay ilaalisaa badqabka hawada ay wada isticmaalaan dhammaan diyaaradaha.

## SI DIYAARGAROOWLEH U DUUL

Diyaargarowgu wuxuu ka caawiyaa duulimaad kasta inuu noqdo mid ka badqab badan oo waxtar badan. Ka hor inta aadan duulin, hubi in diyaaraddaada aan duuliyaha lahayn la diiwaangeliyay marka loo baahdo, ay u hoggaansan tahay shuruudaha Remote ID, isla markaana ay ku jirto xaalad shaqo oo wanaagsan. Hubi cimilada, dib u eeg hawada aad ku duulayso, oo u diyaargaroow hawlgallada caadiga ah iyo xaaladaha lama filaanka ah.Mar walba feejignow oo xusuusnow in diyaaradaha uu duuliyuhu ama shaqaaluhu saaran yihiin ay mudnaanta maritaanka leeyihiin.

### MARKA AY KULA XIRIIRAAN HAY'ADAHA SHARCI FULINTA AMA FAA

- U muuji ixtiraam oo soo deji diyaaraddaada aan duuliyaha lahayn
- U diyaar garoow inaad aqoonsigaaga sheegto oo aad soo bandhigto dukumiintiyada loo baahan yahay haddii ay ku codsadaan shaqaalaha oggolaanshaha haysta.
- Shahaadada Qaybta 107/TRUST, aqoonsiga shakhsiyeed, diiwaangelinta diyaaradda, ka dhaafitaannada, iyo oggolaanshaha kale

Ku xadgudubka xeerarkaan wuxuu keeni karaa ciqaabo dambiyeed ama ganaaxyo madani ah

## NOQO DUULIYE DIYAARAD AAN DUULIYE LAHAYN

*Duulinta diyaaradaha aan duuliyaha lahayn si xirfad leh waxay ku bilaabataa tababar iyo shahaado ku habboon. Helitaanka Shahaadada FAA Duuliyaha waxay kaa caawinaysaa inaad si badqab leh, sharci waafaqsan, oo kalsooni leh u duuliso diyaarad aan duuliye lahayn.*

### *SHURUUDAHA*

- Da'daadu ha ahaato ugu yaraan 16 sano
- Awood u yeelo inaad akhriso, ku hadasho, qorto, oo aad fahamto luuqadda Ingiriisiga.
- Ku sugnoow xaalad jireed iyo maskaxeed oo kuu oggolaanaysa inaad si badqab leh u duuliso diyaarad aan duuliye lahayn.
- Ka gudub imtixaanka bilowga ah ee aqoonta duulista hawada ee: "Unmanned Aircraft General – Small (UAG, Imtixaanka Guud ee Diyaaradaha Aan Duuliyaha Lahayn ee Yaryar)", adigoo ku galaya Xarunta Imtixaanka ee ay Ansixisay FAA.
- Dhammee tababarka soo noqnoqda 24-kii bilood ee taariikhda si shahaadadaadu u sii ahaato mid ansax ah.

## GANAAXYADA IYO CIQAABYADA

Ku xadgudubka xeerarka iyo qawaaniinta FAA wuxuu keeni karaa cawaaqib madani iyo dambiyeed oo culus. Ganaaxyada madaniga ah ee ka dhasha hawlgallada diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee aan la oggolayn ama aan badqabka lahayn waxay gaari karaan ilaa $75,000 xadgudub kasta.

## *HELITAANKA HAWADA LAGU DUULO*

*Low Altitude Authorization & Notification Capability (LAANC, Nidaamka Oggolaanshaha iyo Ogeysiinta Duulimaadyada Joogga Hoose) waa iskaashi u dhexeeya FAA iyo waaxaha warshadaha si loo taageero in diyaaradaha aan duuliyaha lahayn si badqab leh loogu daro hawada qaranka ee lagu duulo.*

Shirkadaha Bixiya Adeegga ee La Ansixiyey:
AirMatrix, Airspace Link,
Aloft, AstraUTM, AutoPylot,
Avison, eTT Aviation,
Flightloop, FlightReady,
Flyfreely, UASidekick, Wing

### *ILAHA WAXTARKA LEH*

Khayraadka soo socda waxaa lagu heli karaa oo keliya luuqadda Ingiriisiga.

**Ku Billoow UAS**

Haddii aad tahay duuliye cusub oo diyaarad aan duuliye lahayn ama aad leedahay sannado badan oo waayo aragnimo duulista hawada ah, waxaa jira xeerar iyo tallooyin badqabka ah oo kaa caawinaya inaad si badqab leh ugu duusho National Airspace System (NAS, Nidaamka Hawada Qaranka).

**Qaado Imtixaanka Badqabka Madadaalada ee TRUST UAS**

TRUST waa imtixaanka badqabka ee bilaashka ah ee internetka oo ay FAA u diyaarisay duuliyayaasha diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ee u duuliya sababo madadaalo leh. Wuxuu ka caawiyaa duuliyayaasha inay fahmaan xeerarka aasaasiga ah ee duulimaadka badqabka leh.

**FAA DroneZone**

FAA DroneZone waa bogga rasmiga ah ee FAA ee diiwaangelinta diyaaradaha aan duuliyaha lahayn iyo adeegyada kale ee muhiimka u ah duuliyayaasha. Wuxuu ka caawiyaa hawl wadeennada inay si habaysan u maareeyaan macluumaadkooda isla markaana ay u hoggaansamaan xeerarka.

Abuur akoon bilaash ah oo iska diiwaangeli qaar ka mid ah tababarrada bilaashka ah adigoo booqanaya www.FAAsafety.gov

**Macluumaadka ku jira buug yarahaan wuxuu ka yimid bogga rasmiga ah ee Federal Aviation Administration (FAA) oo waxaana u adeegsada King County Sheriff's Office (KCSO, Xafiiska Sheriff-ka ee Degmada King) ujeeddooyin waxbarasho awgood.**

### *QORAALLO DHEERAAD AH*

SHERIFF
KING COUNTY

# BADQABKA DIYAARADAHA AAN DUULIYAHA LAHAYN

# MACLUUMAAD GUUD

***QAAR KA MID AH TILMAAMAHA IYO XEERARKA KU SAABSAN DUULINTA NIDAAMKA DIYAARADAHA AAN DUULIYAHA LAHAYN (UAS)***

**BOGGA RASMIGA AH EE FAA (AF INGIRIISI)**

**https://www.faa.gov/uas**

Somali Rev 7/13/2026